

Xeer Madaxweyne J. Maarso 25, 1963, lamba. 122.

Samaynta Qunsuliyadda Guud ee New York (United States of America).

Madaxweynaha Jamhuuriyadda

Markuu arkay qod. 75 ee Dastuurka;
Markuu arkay Sharciga 20 Sebtembar 1960, lamba. 4;
Markuu arkay Xeer Madaxweynaha 7. Febraayo 1961, lamba. 41087-R-14 ka diiwaan gashan Hantidhowrka Guud 11 Febraayo 1961, Reg., lamba. 5, xaashida lamba. 24;
Markuu dhegeestay Golaha Wasiirada;
Isagoo ka duulaya soo jeedinta Wasiirka Arrimaha Dibadda oo heshis la ah Wasiirka Maaliyadda.

Wuxuu Xeeriyay

Qod. 1

Waxaa la dhisay Qunsuliyadda Guud ee Jamhuuriyadda Somaaliya ee New York (United States of America) oo leh degaanka dhulalka soo socda: gobolada New York, Vermont, New Hampshire, Maine, Massachusetts, Rhode Island, Connecticut, New Jersey, Pennsylvania, Ohio, Indiana iyo Mishigan.

Qod. 2

Qunsuliyada laga dhisay safaaradda Washington ee D.P.R. 7 Febraayo 1961, lamba. 41087-R-14 ee lagu sheegay hordhaca, waxay joojisay inay awood ku u yeelato Gobollada ku taxan qod. 1 ee xeerkan.

Qod. 3

Xeerkan ayaa dhaqan galaaya maalinta lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah.
Muqdisho, 25 Maarso, 1963.

Aden Abdullia Osman

Ra'iisul wasaaraha

Abdi-Rashiid Cali Shermarke

Wasiirka Arrimaha Dibadda

Cabdilaahi Issa Maxamud

Wasiirka Maaliyadda

Abdulcadir Mohamed Aden

Arkay oo ka diiwaan gashan - Reg. lamba. 1, xaashida lamba. 80.

Muqdisho, 18 Abriil, 1963.

Hantidhowraha Guud: **Ali Ahmed Omar**